

Laabashada iqtiyaarka

Somali
Informationen für Asylbewerberinnen und Asylbewerber
Warbixinta magangalya doonada


Maxaa dhacaya haddii codsigaaga magangalyada la diido?

Waa lagu soo ogeysiinayaa in codsigaaga magangalyada la diiday oo waxaa lagu siinayaa dhammaadka waqtiga ee ah inaad uga tagtid wadanka. Dhammaadka waqtiga sida caadiga ah waa 30 maalmood. Haddii codsiga magangalyada loo diido ahaanshaha 'u muuqato sabab la'aanta', dhammaadka waqtiga waa hal isbuuc. Haddii aadan uga tagin wadanka si iqtiyaar ah, si xoog ah ayaa lagaaga saari karaa oo lagu dibna laguugu celin karaa wadankii aadkatimid (dib u celinta). Waa inaad bixisaa nafsadaada qarashaadka dib u celintaada oo laguuma ogolaanayo inaad gashid Jarmalka ama wadan kaloo EU ah dhoor sanno (xanibaada gelitaanka). Ma joogi kartid Jarmalka adiga oo aan haysan waraaqaha socdaalka: Waxaa ku xiri kara booliska xili walba oo dibna kuugu celin karo wadankaaga.

Dooro inaad ugu laabatid si iqtitaar ah oo caawin lagaa siiyo maamulada Jarmalka

Haddii aadan haysan lacagta aad uga tageysid wadanka, waxaad caawin ka codsan kartaa dhinaca barnaamijka dib u celinta REAG/GARP. REAG/GARP waxay u taagantahay Barnaamijka Isdhexgalka iyo Socdaalka ee Magangalyada doonada Barnaamijka Dib u celinta Dawlada/Jarmalka. Caawinta dhaqaalaha waxay kugu caawineysaa inaad dib ugu safartid wadankaaga hooyo nafsadaada iyo si taxadir ah laguugu diyaariyo dib u laabashada. Bixitaankaaga waa la diyaarinayaa iyo qarashaadka safarka waa la daboolayaa. Taageerada dhaqaalaha dheeraadka ah sidoo kale waa la helayaa, tusaale ahaan qaabka maalgelinta ama deeqaha. Waxaa sidoo kale jiro caawin dheeraad ah ee kuwa iqtiyaarka ugu laabanayo ee wadamada la doortay si ay ugu suurto geliso inay ka bilaabaan bilow cusub halkaas, tusaale ahaan caawinta iyo shaqo ka helida ama guriyeynta. Dooqyada kala duwan waxaa looga hadli karaa kulanka dib u celinta gaarka ah.

Isticmaal tallada bilaashka ah ee halkaan lagu bixiyo ee ku saabsan wadan ku laabashada



Haddii aad daneyneysid inaad si iqtiyaar ah ugu laabatid wadankaaga, waxaad weydiin kartaa la taliyayaasha dib u celinta halkaan su'aalo walba ee aad qabtid oo qarsoodi ahaan ah. La taliyayaasha dib u celinta waxay kugu caawinayaan inay kuu diyaariyaan bixitaankaaga, ay kuu dalbaan maalgelinta REAG/GARP iyo caawin walbaa dheeraad ah oo loo heli karo dadka sida iqtiyaarka ah ugu laabanayaan wadankooda. Haddii aadan laheyn waraaqaha safarka oo saxan, waxaa sidoo kale laguugu caawinayaa helitaanka badelida waraaqaha baasaboorka. Turjubaan ayaa la isticmaali karaa inta lagu jiro kulanka la talinta si loo hubiyo inaad fahamsantahay wax walba. Waxaad sidoo kale la imaan kartaa qof xarunta la talinta dib u celinta oo adiga kuu fasiro.

Waxaad sidoo kale tallo ka raadin kartaa la taliyayaasha dib u celinta adiga oo codsigaaga magangalyada laga baaran dagayo. Tani ma sababeysa go'aanka ugu dambeeyo ee magangalyada.

Laabashada iqtiyaarka ah sidoo kale waa suurto gal haddii nidaamka magangalyada aanan weli la dhameystirin. Xaaladaan, waa inaad joojisaa codsigaaga magangalyada ka hor inta aadan ka tagin wadanka. Kadib markaad joojisid codsigaaga, waraaqahaaga safarka ayaa waxaa soo dirayo Xafiiska Faderaalka ee Socdaalka iyo Qaxootiga (BAMF) u soo dirayaan xafiiska diiwaanka ajaanibta ee masuulka kaa ah (xafiiska ku siiyo ruqsadaada daganaanshaha ku meelgaarka) oo halkaas ayaa laga qaadan karaa.

Waxaad ka heli kartaa xarunta la talinta dib u celinta halkaan ee ciwaanka xafiiska:

Elisa Müller
Amt für Migration und Integration
Schützenstraße 69; 88212 Ravensburg
2. OG, Raum 219
Tel.: 0751/85-9857
E.Mueller@rv.de

Sebastian Leidinger
Amt für Migration und Integration
Schützenstraße 69; 88212 Ravensburg
2. OG, Raum 219
Tel.: 0751/85-9886
S.Leidinger@rv.de

Haddii aad leedahay gelitaanka Intarneetka, waxaad ka heli kartaa warbixin dheeraad ah ee ku saabsan laabashada iqtiyaarka ah:
www.returningfromgermany.de/en/

Waxaa la saxay: Febraayo 2018

BAMF

